



Cuntooyinka Isu dheelitiran





Cuntooyinka Isu dheelitiran

Leveled

Grade 2

Week 13



Buuggan akhriska dheeriga waxaa maalgalisay hay'ada USAID. Waxaana si wada jir ah isaga kaashaday daabcayna hay'ada Save the Children, wasaarada waxbarashada heer federal iyo xafiiska waxbarashada DDSI.

2008 T.I.



The CC By license lets others distribute, *adjust*, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.


For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>



Cuntooyinka isu dheelida
tiran waa cuntooyinka leh
nafaqooyinka kala duwan.



Cuntooyinka aan cuno
waxaan ka helnaa,
booratiin, fiitamiin iyo
tamar.



Cuntooyinka qaar wuxuu
jidhkeenu ka helaa
booratiino.



Waxaana ka mida
hiblibka, digirta, kaluunka
iyo ukunta.



Cuntooyinku jidhkeena
ayay dhisaan.



Cuntooyinka qaarna wuxuu
jidhkeenu ka helaa tamar.




Waxaa ka mida
canjeerada, rootiga,
sareenka iyo qamadiga.




Cuntooyinkan waxay
jidhkeena siiyaan awood
uu ku shaqeeyo.



Cuntooyinka qaarna
wuxuu jidhkeeno ka
hela fiitamiino.



Waxaana ka mida
canabka, liinta, mooska
iyo kaaroodka.



Cuntooyinku waxay
kordhiyaan dhiiga iyo
dheecaanka jidhkeena.



Hadaba waa inaynu
cunaa cuntooyinka isu
dheelitiran.

